

Xiiq-dheerta: Waxa ay Tahay Inay Waalidiintu Ogaadaan

Waa maxay xiiq-dheertu?

Xiiq-dheerta, ama jix-dheerta, ayaa ah jirro qufac aan kala joogsi lahayn. Qof kasta oo da' kasta jira ayaa qaadi kara xiiq-dheerta.

Maxay yihiin calaamadaha xiiq-dheertu?

Calaamadaha ugu horreeya ee xiiq-dheertu waxay u eg yihiin sida durayga. Hal ama laba toddobaad kaddib, qufacu wuu sii xumaanayaa oo wuxuu u dhici karaa si lama filaan ah, oo aan kala joogsi lahayn. Mararka qaarkood qufaca ayaa horseedi kara matag ama xiiqo marka gudaha loo neefsano. Dadka xiiq-dheerta qaba ayaa u muuqan kara inay iska caafimaad qabaan inta u dhaxeysa muddada gaaban ee qufaca. Muddooyinkan gaaban ayaa soo noqnoqodkoodu yaraadaa muddo kaddib, laakiin waxa laga yaabaa inay sii socdaan dhowr toddobaad ama bilooyin ilaa iyo inta ay sambabbadu ka bogsanayaan.

Sidee ayay xiiq-dheertu ku faaftaa?

Bakteeriyada xiiq-dheerta ayaa lagu faafiyaa hooraha soo baxa marka qufacayo ama hindhisayo. Hoorahan ayaan si aad ah ugu socon karin hawada waxayna badanaa cudurka qaadsiiyaan keliya dadka ka ag dhow.

Goorma iyo muddo intee la'eg ayuu qofku ku faafin karaa xiiq-dheerta?

Dadka qaba xiiq-dheerta ayaa qaadsiin kara dadka kale 3-da toddobaad ee ugu horreysa quficidda ama ilaa iyo inta ay ka dhammaystiranayaan 5 maalmood oo ku daaweyn antibiyootig ah, hadba kii dhaca marka hore.

Sidee looga hortagaa xiiq-dheerta?

Tallaalka ayaa ah habka ugu wanaagsan ee looga hortago cudurka xiiq-dheerta. Tallaalka ka dhanka ah xiiq-dheerta ayaa qayb ka mid ah tallaallada si joogta ah lagu taliyo in carruurta la siiyo. Xoojiyaha tallaalka xiiq-dheerta ayaa sidoo kale lagula talinayaa dhalinyarada aan qaangarrin iyo kuwa qaangaarka ahba. Weyddii bixiyahaaga daryeelka caafimaadka macluumaad intaa ka badan.

Dadka laga tallaalay cudurka xiiq-dheerta ayaa waxa laga yaabaa inay wali qaadaan cudurka xiiq-dheerta, laakiin guud ahaan waxay yeelan doonaan jirro fudud.

Antibiyootiga ayaa mararka qaarkood lagula taliyaa dadka si looga hortago xiiq-dheerta dadka xiriirka dhow la leh qofka qaba xiiq-dheerta, sida xubnaha qoyska.

Ma jiraa tijaabo shaybaar loogu talagalay xiiq-dheerta?

Haa, laakiin kaliya waa haddii qofku qabo calaamado. Inta ugu badan, sanko marinkiisa ayaa suuf lagu nadiifiyaa oo markaana suufka ayaa la baaraa inay ku jirto bakteeriyada xiiq-dheerta. Mararka qaarkood tijaabo la adeegsado dhiigga ayaa la sameeyaa si loo ogaado falcelinta difaaca.

Muddo intee la'eg ayuu qof qaba xiiq-dheerta ah inuu guriga ka joogo xannaanada carruurta, dugsiga, shaqada, iwm?

Dadka qaba xiiq-dheerta waa inay guriga joogaan oo aanay tagain xannaanada ilmaha, dugsiga, shaqada, iyo waxqabadyada kale ilaa ay ka dhammaystiranayaan 5 maalmood oo ay qaataan antibiyootiga, haddii ay horay u qufacayeen 3 toddobaad ama ka badan mooyaane.

Talooyin dheeraad ah

- Dhaq gacmaha inta badan.
- Guriga joog haddii aad jirran tahay.
- Markaad qufacayso, afkaaga ku dabool tiish (tissue) ama ku qufac maradaada.

Vaccine-Preventable Disease Section
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5414
www.health.state.mn.us/pertussis

6/25/2019 – Pertussis: What Parents Need to Know (Somali)

Si aad ugu hesho macluumaadkan qaab kale, wac: 651-201-5414.